

Daryeelka Carruurta la Raqiisiyay

May 2008

Barnaamijka Daryeelka Carruurta la Raqiisiyay wuxuu kaa caawiyaa bixinta khaashka daryeelka carruurta. Wuxuu caawiyaa qoysas noocyo badan. Waxaa ka mid ah:

- Qoysaska qaata TAF (Caawinada ku meelgaarka ah ee Qoyska)- Barnaamijkaan wuxuu ka caawiyaa qoysaskaas in ay helaan oo haystaan shaqooyin.
- Qoysaska dan-yarta ah ee shaqeeya
- qoysas ku jira hawlo wax barasho ama tababar- Tani waxay ka caawinaysaa haysashada shaqada ama helitaankeeda.
- Waalidiinta dhowr-iyo-toban jirka ah ee dugsi sare ama GED dhamaysanaya.

Si ay ugu qalmaan, qoysasku waa inay sameeyaan arrimahaan:

Hadii waalid/mas'uul/daryeele uu u baahan yahay carruur hayn, wuxuu barnaamijka ka caawin karaa dhanka dhaqaalaha. Dadku waa inay dalbadaan, oo ay naftooda yimaadaan. Qoyska iyo canuggu waa inay ku noolyihiin Kansas. Waa inay keenaan warbixinta dakhligooda. Haddii waalid uu guriga ka maqan yahay, kan jooga waa inuu la shaqeeyo hay'adda Taageerada Carruurta Xoojisa.

Canugu waa inuu ka yar yahay 13 jir. Haddii cunug jira 13-18 uusan is daryeeli Karin, way u qalmi karaan in a caawiyo mararka qaar. Shaqaaluhu waxay tix gelinayaan xirfadaha is-daryeelka ee jirka iyo maskaxda labadaba. Hadday Maxkamadi ka war qabto canuga, wuxuu u qalmi karaa in la caawiyo.

Warbixinta Dakhliga:

Shaqaaluhu waxay tix-gelinayaan dakhliga soo gala qof walboo qoyska ah bishii. Dakhliga waxaa ka mid ah mushaarka intaan canshuurta laga jarin iyo taageerada carruurta. Shaqaaluhu ma xisaabinayaan dakhliga qaar. Tusaaleyaasha waxa ka mid ah SSI iyo Daynta Ardayda.

Haddii dakhliga qoysku gaaro heerka barnaamijka, waxay u qalmi karaan caawinaad haynta carruurta ah. Qoysasku waxay u isticmaalaan caawimadaan bixinta kharashka ku baxaya qofka ay u doorteen inuu caruurta u hayo. Qoysaska badanaa waa inay bixiyaan qayb ka mid ah kharashka ilmo haynta. Lacagta lagu caawinayo way kala badalan tahay waxayna ku salaysan tahay duruufta qoyska u goonida ah.

Dakhliga ugu badan ee bishiiba waa sidan:

- Qoyska ka kooban 2- \$2,159
- Qoyska ka kooban 3- \$2,714
- Qoyska ka kooban 4- \$3,269
- Qoyska ka kooban 5- \$3,824
- Qoyska ka kooban 6- \$4,379

- Qoyska ka kooban 7- \$4,934
- Qoyska ka kooban 8- \$5,489
- Qoyska ka kooban 9- \$6,044
- Qoyska ka kooban 10- \$6,599
- Qoyska ka kooban 11- \$7,154
- Qoyska ka kooban 12- \$7,709

Shaqaalaha Caruurta Haya:

Qoysasku waxay ka dooranayaan caruurta qofka u haya moocyada soo socda:

- Xarun sharciyeysan oo carruuta lagu hayo
- Guri sharciyeysan oo Qoys u haya caruur
- Guri sharciyeysan oo koox u haya caruur
- guri carruurta lagu hayo oo diiwaan gashan
- Qaraabada canugga (Canuga la geynayo guriga qaraabada)
- Carruur haye imanaya guriga caruurta.

Haddii uu qof hayo cunugiisa, SRS ma caawinayso. Sidoo kale haddii qofka ilmaha haya uu ku nool yahay guriga, SRS ma bixinayso wax caawino ah. Waa in shaqaalaha caruurta waa inay iska diiwaan galiyaan SRS si ay xaq ugu yeeshaan lacagta waalidka. Waa inay lacagtooda ku qaadan karaan qaab toos loogu soo shubayo (Loogu Xawilo) akoon bangi.

Shaqaalaha la sharciyeeyay ee doonaya inay SRS iska diiwaan galiyaan si ay ugu adeegaan qoysaska loo raqiisay waa inay soo wacaan 1-888-369-4777 ama xafiiska SRS ee u dhow.

Siday Waalidku u bixinayaan

Adeegyada haynta carruuta waxaa loo qabtaa qoysaska haysta Kaarka Lagu soo Xawilo Caawinada (EBT) kaarka Vision. Wuxuu la mid yahay kaarka bangiga. Lacagta iyo Rsshinka caawinada ah waxaa loogu soo shubaa kaarka Vision. Caawimada waxaa lagu soo shubaa akoonka haynta caruurta ee kaarka Vision bil walba kowdeeda. Qoysasku waxay u isticmaalaan caawinadaan in ay shaqaalaha u siiyaan lacagtooda bisha si electraronig ah. e-Funds Corporation waa qandaraaslaha EBT ee Kansas. Waxay lacagta u wareejiyaan akoonka bangiga ee shaqaalaha marka qoysku codsadaan. Shaqaaluhu waa inay iska diiwaan geliyaan eFunds Corp. si ay lacag u helaan.

Warbixin dheeraad ah:

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka haynta carruuta ee la dhimay

- Booqo: www.srskansas.org
- Wac: 1-888-369-4777
- Ka qaado arji SRS Xafiiskeeda/Xarunta xariirka.